



# Orientation to Ontario

## XADGUDUBKA ILMAHA

Xadgudubka ilmaha ayaa dhaca marka waalid ama daryeelo uu waxyeelo u gaysto ilmo ama dhalinyaro wuxuuna noqon karaa mid jireed, dareen ama galmo waxaana ku jira dayacaada. Arintaan sharci daro ayay ka tahay Canada. Children's Aid Society (CAS) ayaa baarta dhammaa warbixinnada xadgudubka ilmaha waxayna xaqiijisaa in carruurta ay ku noolaadaan goob amaan iyo taageero leh.

Xadgudub jireed - fal kasta oo keenaaya waxyeelo ama dhaawac.

Waxaa ku jira nabar ku dhufashada, feerida, laadista, gubista ama falalka kale ee khatarta ah sida u diidista cuntada oo ilmaha looga dhigo ciqaab ama qol kusoo xirista ilmaha.

Dharbaaxada - ku dhufashada ilmaha dharbaaxo si aad u saxdo habdhaqankooda. Waa sharci gudaha Canada laakiin raac tilmaamahaan:

- Ha dharbaaxin ilmaha sabab la xariirta inaad caraysan tahay.
- Ha adeegsan sheey ama xoog badan oo keenaaya dhaawac ama daqar.
- Ha dharbaaxin ilmo kayar 2 sano kana wayn 12 sano

Waalidiinta iyo daryeeyaashu waa inay raadiyaan qaabab kale oo ay ku edbiyaan ilmahooda.

Xadgudubka Dareenka - wuxuu waxyeelo u gaysan karaa kobaca ilmaha wuxuuna keeni karaa dhibaatooyin nololeed mustaqbalka. Noocyada ugu badan waxaa kamid ah:

- u diidista kagaceelka ama inaad ilmaha u ogolaan inay saaxiibadood la ciyaaraan
- ilmaha waajahaaya rabshada qoyska

- inaad markasta mucaarado, bahdsho, ku qayliso aadna ku buuqdo.

Dayaca - inaad ilmaha siin baahiyaha aasaasiga ah. Dadka waawayn waxaa laga doonayaa inay baxshaan waxyaabaha soo socda:

- cunto, hooy, dhar iyo daryeel caafimaad
- kormeerida iyo xaqiijinta inay dugsiga xaadiraan
- jacaylka, taageero.

Haddii waalidiinta ama daryeeyaasha kale aysan buuxin baahiyaha aasaasiga ah ee ilmahooda, waxay galayaan danbiga xadgudubka. Haddii waalidiintu ay dhib ku qabaan daryeelida ilmahooda, sabab la xariirta walaac, dhibaatooyin caafimaad ama dhaqaale, Children's Aid Society iyo wakaaladaha kale ee dawlada ayaa kaa caawin doona xaqiijinta in ilmuhu helaan daryeel.

Xadgudubka Galmada ama Kufsigu ilmaha - fal kasta oo galmo oo ilmaha lagula kaco.

Waxaa ku jira taabashada jirka ama nooca kale ah ee galmada. Markasta waa xubin kamid ah qoyska ama saaxiibka qoyska waxa xadgudubka galmada u gaysta ilmo ama kuray. Xadgudubka galmada waxaa gaysan kara dadka waawayn, kurayga ama carruurta kale.

Filimada qaawan ee ilmaha laga duubay iyo ka ganacsiga galmada ee lagu qasbay ilmaha ayaa ah tusaaleyaasha caanka ah ee xadgudubka galmada. Abuurista, haysashada iyo daawashada filimaanta galmada ee ilmaha oo la gasho interneedka ama sawiro laga haysto waa danbi aad u wayn.

DA'DA OGOLAANSHO BIXINTA - ilmaha kayar 16 sano ayaan sharciyan ogolaan karin inay fal galmo sameeyaan, xataa haddii ay aqbalaan

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>



Funded by / Financé par :

inay ka qayb galaan.

- Inaad u galmooto ilmo kayar 16 sano sharciyan waa kufsi waana danbi aad u xun.
- Ma jiro qof kayar 18 sano oo ogolaan kara inuu ka ganacsado galmada ama filimaanta galmada.

Ogolaanshaha Guurka - gudaha Ontario waa qasab inaad jirto 18 sano si aad u guursato qof adoon oggolaansho ka haysan waalidka.

Ma jiro qof lagu qasbi karo ama lagu dagi karo inuu qof kale guursado da' kastaba ha jiree, qof kasta oo xaas lehna wuxuu furiin sharci ah kasoo qaadan karaa maxkamad, xataa haddii xaaskaagu diidan yahay.

#### CAWAAQIBYADA XADGUDUBKA ILMAHA

Haddii Children's Aid Society ay isleedahay ilmahaagu khatar ayay ku jiraan, way kaa qaadan karaan muddo kooban ama si abadiyan ah, ayadoo ku xiran darnaanta xadgudubka. Xadgudbaha waa la xiri karaa.

Qof kasta oo qaangaar ah oo ku nool Ontario sharciga ayaa qasab uga dhigaaya inuu soo sheego xadgudubka ilmaha dhammaan warbixinaduna waa qarsoodi.

Ilmuhu waa inay xadgudubka u sheegaan macalinka, dhakhtarka ama qof kale oo wayn oo ay ku kalsoon yihiin.

SI AAD U SOO SHEEGTO XADGUDUBKA ILMAHA Wac 211 oo waydii lambarka taleefanka Children's Aid Society.

Booqo webseedka Ururka Ontario ee Iskaashatada Gurmadka Ubadka oo ah [oacas.org](http://oacas.org) Haddii aad isleedahay ilmo ayaa khatar degdeg ah ku jira, wac

9-1-1 kadibna codso booliiska.

U soo sheeg khiyaannada ilmaha loo gaysto Cyber Tip oo aad ka helayso [cybertip.ca](http://cybertip.ca)

